

Wanaagsantahay in laga warhaayo

HPV



Folkhälsomyndigheten
PUBLIC HEALTH AGENCY OF SWEDEN

HPV waa faayrus si xoog leh u faafo oo nolosha dambe sababi karo kansar. Tallaalka HPV wuxuu kaa difaaci cudurka kansarka. Dhammaan carruurta waxaa lagu martiqaadi tallaalka oo bilaa lacag la'aan oo waxaa bixin kaalkaalisada iskuulka oo fasalka 5.

Cudurada uu HPV sababta u noqdo

HPV waa magaca humant papillomvirus oo la soo gaabshay iyo la kala qaado markii galmo la suubiyo. Faayraska HPV wuxuu kala yahay dhowr nooc, oo noocyadas qaar kamid ah waxey sababi karan in nolosha dambe cudurka kansarka kugu dhaco.

Bulshada inta ugu badan mar un noloshooda wuu ku dhaca HPV, laakin bulshada tirada inta ugu badan ma ka warhaayan maadama uusan eheen mid la dareemi ama muuqdo. Xaaladaha inta ugu badan infekshanka qofka wuu ka fiicnaan, laakin marmar qofka wuxuu haayn muddo dheer. Markas waxaa kordhi halista in nolosha dambe kansar kaaga dhaco dhuunta, makaanka, xubinta dhalmada (cambarka ama guska) ama malawadka qaybtiisa hoose.

Sanadkasto Iswiidhan waxaa ku dhaco 800 dumar iyo 300 rag noocyada cudurka kansarka midkood oo faayraska HPV sabab u yahay.

Tallaalka waa difaac ka hortagid

Tallaalka wuxuu kaa difaaci infekshanka inta ugu badan oo noocyada faayraska HPV oo sababikaro kansar. Si uusan infekshanka kugu dhicin waxaa fiican qofka inuu wakhti hore is tallaalo, intuuusan qof weeyn oo qaankar noqon iyo inta uusan suubin galmada koowad. Haddii qofka uu qaaday infekshanka noocyada kala duwan midkood oo faayraska HPV tallaalka ma'kaa difaacikarto noocyadas oo HPV.

Tallaalka waa mid muddo dheer la soo isticmaalay iyo la soo tijaabiyay

Tallaalka looga hortagi HPV waxaa la siiyay dhowr malyuun qof oo aduunka meelkasto uga nool. Cilmi baaritaanaada lagu suubiyay Iswiidhan iyo dhowr wadan oo kale waxaa laga arkay in tallaalka yahay mid difaac wanaagsan leh iyo ah ammaan.

Iswiidhan dhammaan tallaalka HPV waa la diwaangaliyaa oo waxaa lagu qori liiska qaranka oo tallaalka. Taasna waxey suurtagalin in dabogal lagu suubinkaro in tallaalka yahay ammaan iyo leeyahay saameynta laga dooni.

SIDAN BAA LOO SUUBIN TALLAALKA

Kaalkalisda iskuulka waxey cirbada tallaalka kaa qeybta kore oo gacanta. Tallaalka waa labo qeyb. Waxaa ugu yaran u dhaxeeyn lix bilood tallaalkada.

Tallaalka ka hore

La xiriiir kaalkaalisada iskuulka oo iskuulka canugaaga dhigto haddii ey jiran su'aalo ama waxkale aad ku fikireysid tallaalka ka hore.

Tallaalka kadib

Waa caadi qofka in dhanqasho ka dareemo, midab gaduud yeelato, bararto ama cuncunto gacanta meesha qofka laga tallaalay. Dadka qaarkood qandho muddo gaban hayso bey dareeman, madax xanuun iyo dareen guud oo sidii qof jiro hayso camal. In allerji [xasaasiyad] laga qaado aad bey dhif u tahay.

Haddii aad ka walwalsantahay caafimaadka canugaaga markii la tallaalo kadib waxaad la xiriiiri kaalkaalisada iskuulka ama isbitaalka.

SKYDD
FÖR LIVET




Miyaa dooneysa warbixin kale?

Haddii aad dooneysid warbixin dheer tallaalka ka hore, la xiriir kaalkaalisada canugaaga iskuulkiisa joogto.

BARNAAMISHKA TALLAALIDA OO ISWIIDHAN

Tallaalka HPV wuxuu kamid yahay barnaamishka tallaalka oo iswiidhan.

XARUNTA CAAFIMAADKA CARRUURTA



ISKOOLKA

